


## Sida Tallaalada mRNA COVID-19 U Shaqeeyaan

3/29/2021

Nooca fayraska ee sababa COVID-19 waxaa loogu yeeraa korona fayras. Korona fayras wuxuu leeyahay geeso wareegga dhan uga dhagan. Geesahaan waxaa loogu yeeraa barotiin-qodxeed (spike proteins). Barotiin-qodxeedka (spike proteins) ayaa ku dhaga kadibna gudaha ugala unugyada jirkeena kadibna xanuun nagu rida. Cilmi baarayaasha caafimaadku waxay ogaadeen furaha barotiin-qodxeedka (spike proteins) ee sababa COVID-19. Waxay u adeegsadeen macluumaadkan si ay u sameeyaan tilmaamo (messenger RNA (mRNA)) ay ku baraan unugyada jirkeena sida loo sameeyo nuqulka barotiin-qodxeed been-abuur ah (spike proteins) loolana dagaalamo.



Cilmi baarayaasha ayaa sameeyo tilmaamahaan (mRNA) oo u sheegaaya jidhkaaga inuu sameeyo nuqulka barotiin-qodxeedka been abuurka ah. mRNA-ga ayaa lagu darayaa talaalka.

Marka tallaalku galo jidhka, mRNA-ga tallaalka ku jira ayaa galaaya warshadaha yaryar ee barotiinka oo ku jira unugyada jirka ee aaga gacantaada ee cirbada tallaalka lagu duray. Jirkaaga ayaa u adeegsada mRNA-ga inuu sameeyo nuqullo badan oo qodxaha barotiinka fayraska ta korona ee been abuurka ah. Maadaama aynan ahayn mid run ah, tallaalka kama aqaadi kartid COVID-19.

Nidaamkaaga difaaca jidhku waa waxa kaa caawiya inaad la dagaasho xanuunka. Wuxuu leeyahay dagaal yahano badan oo la dagaalamo bakteeriyada iyo fayrasyada. Marka nidaamkaaga difaaca jirku arko qodxaha been abuurka ah, wuxuu u qaadanaaya inaad qabto COVID-19, inkastoo aadan qabin. Nidaamka difaaca ayaa intaas kadib sameeya dagaalyahanno badan. Dagaalyahanadaan waxaa loogu yeeraa difaacyada jirka. Dadka qaar ayaa dareemi kara dhibaatooyin ka dhasha inta jirkoodu samaynaayo difaacyada si uu ula dagaalamo qodxaha been abuurka ah.

Hadda, jidhkaaga ayaa dhisay dagaalyahanno badan si uu kaaga difaaco COVID-19 adigooon la jiran caabuqa COVID-19. Tani waxay qaadataa ku dhawaad labo asbuuc kadib kuuradaada ugu danbaysa. Haddii fayrasku galo jirkaaga kadib waqtigaan, jirkaaga ayaa si fudud u weerari kara fayraska COVID-19, waayo horay ayuu fayraska uga bartay nuqulka been abuurka ah ee lagu siiyay. Waa sidan sida uu kaaga joojinayaa inaad jirato.

- Kadib marka jirkaagu sameeyo qodxo, waxay burburisaa mRNA.
- Tallaalka kama qaadi kartid COVID-19.
- Ma jiro fayras COVID-19 ah oo ku jira tallaalka mRNA.